

## Waa maxay Early Achievers?

Early Achievers waa xayndaabka kor u qaadidda tayada la arki karo ee daryeelka carruurta iyo goobaha waxbarashada hore si ay uga caawiyaan:

- ◆ **Waalidiinta** inay helaan barnaamijyada daryeelka carruurta oo tayo sare leh iyo waxbarashada hore ee ku haboon baahiyadooda iyagoo siinayo warbixinta ku saabsan tayada xarunta.
- ◆ **Carruurta** leeyihiin waaya aragnimada barashada hore oo tayo sare leh oo ka caawiso iyaga in ay hormariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay ugu guulaystaan dugsiga iyo nolosha.
- ◆ **Xirfadlayaasha Waxbarashada Hore** waxay helaan macluumaadka iyo kaalmooyinka ay u baahan yihiin si ay u bixiyaan daryeel tayo leh oo taagyeera waxbarashada iyo horumarka ilmo kasta.

Ka qeybgalka Early Achievers, bixiyayaasha daryeelka carruurta waxay ku muujiyaan ballanqaada inay hagaajiyaan tayada daryeelka carruurta marka waxaad dareemi kartaa kalsooni ku saabsan doorashada daryeelka carruurta.


Ka qaybqaadashadu waa u lacag la'aan bixiyayaasha sidaas darteed ma jiro kharash dheeraad ah oo ay bixinayaan qoysaska.



Early Achievers waxay bixisaa macluumaad ku saleysan caddeyn oo ku saabsan tayada barnaamijyada waxbarashada hore iyagoo ah hab qiimeyn si sahlan loo fahmi karo.

- ◆ Bixiyayaasha ka shaqeeynaya ama lagu qiimeeyo **Heerka 2** waxay "ka qaybgalayaan horumarinta tayada" iyada oo loo marayo tababar iyo adeegyo.
- ◆ Bixiyayaasha lagu qiimeeyo **Heerka 3-5** waxay gaareen "Heerka tayada ugu sarreysa" iyagoo maray qiimaynta goobta.

Ka fiiri xaaladda bixiyayaasha ka qaybgalkooda Early Achievers [www.del.wa.gov/check](http://www.del.wa.gov/check).



Si aad u hesho daryeelka carruurta oo shatiga leh oo bulshadaada, kala xiriir Child Care Aware of Washington: 1-800-446-1114 [www.childcareaware.org](http://www.childcareaware.org)

Ka fiiri xaaladda bixiyahaada shatigiisa Care Child Check: [www.del.wa.gov/check](http://www.del.wa.gov/check)

Si aad wax dheeraada uga barato Early Achievers [www.del.wa.gov/early-achievers](http://www.del.wa.gov/early-achievers)

Si aad wax dheeraada uga ogaato doorashada daryeelka carruurta iyo kaalmada kharashka daryeelka carruurta: [www.del.wa.gov/parents-family/licensed-child-care](http://www.del.wa.gov/parents-family/licensed-child-care)



P.O. Box 40970  
Olympia, WA 98504-0970  
Telefoonka bilaashka: 1.866.482.4325

[www.del.wa.gov](http://www.del.wa.gov)

**Filashada Carruurta, Waa Ujeedadeena!**

## Waxaad leedahay Ikhtiyaariyad!

Tilmaamaha Helitaanka Daryeelka Carruurta Tayada Leh iyo Goobaha Waxbarashada Hore ee Gobolka Washington



**Tayadu Macno ayay Leedahay!**



## Waa maxay sababta aan daryeelka ilmaha ee shatiga leh ugu dooranayo ilmahayga?

Waaxda Waxbarashada Hore ee Gobolka Washington (DEL) waxay u siisay ruqsad in ka badan 7,000 oo bixiyayaasha daryeelka carruurta ee Washington. Xarumaha daryeelka carruurta ee ruqsada haysta waxay raacaan xeerarka shatiga gobolka si loo hubiyo in carruurta helaan deegaan ammaan ah oo caafimaad qaba.

Bixiyayaasha ruqsada haysta:

- ◆ Helaan hubinta caafimaadka iyo ammaanka si loo hubiyo in goobaha ay nabad u yihiin carruurta.
- ◆ Helaan tababarka koritaanka carruurta.
- ◆ Helaan tababarka gargaarka degdega iyo CPR.
- ◆ Laga soo baara asalkoodii dambiyo horay inay u soo galeen qof kasta oo carruurta la soo xiriiraya.

Raadiyaha Daryeelka Carruurta waa khayraad kale si uu uga caawiyo qoysaska inay doortaan helitaanka daryeelka carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore. Booqo [www.del.wa.gov/](http://www.del.wa.gov/) check si aad u aragto macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan taariikhda ruqsada barnaamijyada, macluumaadka shaqaalaha aasaasiga ah, falsafadda barnaamijka, iyo heerka tayo ee Early Achievers, ee nidaamka Washington ee qiimaynta iyo hagaajinta tayada.



## Doorashada daryeelka carruurta

Waa maxay waxyaabaha muhiimka u ah adiga iyo qoyskaaga marka aad dooranayso barnaamijka waxbarashada hore: Kharashka? Saacadaha? Tayada daryeelka? Waxaa fiican oo ku caawin karta inaad horay u sii qaadato marka aad booqanayso goobaha. Soo qaado su'aalaha kuwa kugu muhiimsan ee aad qabto, oo weydii inta aad ku jirto booqashada. Ha hilmaamin inaad weydiiso haddii ay ka qabygalayaan Early Achievers!

## Degaanka mid ammaan iyo caafimaad leh baa?

- Ma jiraan xubno shaqaalaha oo ku filan inay siiyaan carruurta oo dhan dareenka ay u baahan yihiin?
- Alaabta iyo qalabku ma yihiin kuwo ammaan ah oo da'da ku haboon?
- Shaqaalaha ma leeyihiin tababarada CPR iyo gargaarka degdega?
- Carruurta iyo shaqaalaha miyay faraxa dhaqdaan?
- Ma jiraan tababarada dab damiska caadiga?
- Aagga ciyaarta ee dibadda ma u muuqda mid ammaan ah?
- Ma leeyihiin albaabadu qufulo ka ilaalinaya in dadka shisheeyaha ahi iska soo galaan iyo carruurta ku haya gudaha?
- Ma jiraan xeerar ah marka ilmuhu xanuunsanayo?
- Intee jeer ayaa xafaayadda laga beddela?
- Ma jiraa qorshe degdega oo lagula xiriiri karo qoysaska?

## Waa maxay waayo-aragnimada uu heli doono ilmahayga inta lagu jiro maalinta?

- Ma jiraan hawlo la qorsheeyay oo ka caawinaya ilmahayga inuu wax barto?
- Ilmahaygu ma yeelan doonaa waqti maalin kasta in uu ordo, wax qabto, fuulo oo wax tuuro?
- Carruurta ma haystaan waqti ay ku ciyaari karaan oo iyaga u gaar ah oo ma ay heli karaan alaabta iyo hawlaha ay u baahan yihiin?
- Waqtiga TV-ga iyo kombuuterka ma xaddidan yihiin?
- Wakhtiga nasashada ma ku salaysan yahay baahida ilmo kasta u goonida?
- Ma leeyihiin buugaag badan oo carruurta?
- Buuggaagta ma lagu heli kara iyagoo carruurta luqaddooda ku qoran oo da'doodu kala duwan tahay?
- Dhaqamada qoysaska ma lagu ixtiraama adeegyada iyo dabbaaldega?
- Waa maxay xeerarka ku saabsan cuntada guriga laga keeno?

## Waa maxay siyaasadaha saamaynaya isdhexgalka ilmahayga iyo dadka kale?

- Shaqaalaha ma dejiyaan xadad ah kuwo macquul ah, oo cad, oo joogto ah oo da'da ku haboon?
- Shaqaalaha ma isticmaalaan codad dagan iyo adeegyo kale oo ka wareejinta carruurta haddii ay jirto dhibaato?
- Maxaa dhacaya marka carruurta wax isku dhufato, is qaniinaan ama is caayaan?

Sidee buu barnaamijku u hawlgeliya qoysaska?

- Anigu ma laygu dhiirigelinayaa in aan waqti u siiyo marti ahaan ama tabaruce ahaan xilliga qadada?
- Sidee baan ku maqli doonaa waxyaabaha ku saabsan maalinta ilmahayga?
- Ma dareemayaa in la ii qadarinayo inaan ahay macallinka koowaad ee ugu muhiimsan ee ilmahayga?

## Ilmahaygu halkan ma ku barbaari doonaa?

- Dhaqamada, qowmiyadaha iyo awoodaha kala duwan ma la qiimeeynaya?
- Shaqaalaha ma u muujiyaan waji farxad leh, la hadalaan, la ciyaaraan, oo dhagaystaan carruurta?
- Shaqaalaha ma dhiirgeliyaan hal-abuurka iyo madaxbannaanida da'da ku haboon?
- Shaqaalaha ma qabtaan oo ma hayaan dhallaanka, socod baradka inta badan, oo ay ku jiraan marka ay quudinayaan?
- Dadka isku mid ah miyaa si joogto ah u hayn doona daryeelka ilmahayga?
- Carruurta ma la dejiya marka loo baahdo?
- Goobta ma mid ifaysa, oo wanaagsan, oo lagu faraxsanahay baa?
- Ilmahaygu ma u arki doonaa mid xiiso leh halkan?



Filashada Carruurta, Waa Ujeedadeena!